# Hagaha loogu tala galay qoysaska Finland iyo Turku u soo guuraya

Ku soo dhawoow Turku!  Ku soo dhawoow iskuulka!

Hagahani wuxuu kuu sheegayaa sida ay iskuul dhigashada Finland iyo Turku yihiin iyo waxa ku jira, xuquuqaha iyo waajibaadka la xiriira.


Hagaha loogu tala galay qoysaska Finland iyo Turku u soo guuraya ........ 1
Ku soo dhawoow Turku!  Ku soo dhawoow iskuulka! ........ 1
Waa maxay hadafka waxbarashada diyaarinta ahi? ........ 2
Iskuulku wuxuu ardayga u sameeyaa barnaamij waxbarasho ........ 2
Iskuulkee ayaa Turku leh waxbarashada diyaarinta ah? ........ 2
Waxyaabaha muhiimka ah ee iskuulada Finnishka ........ 2
Dharka iskuulka ........ 3
Iskuulka maxaa muhiim ah? ........ 3
Maxay tahay in uu ardaygu sameyo? ........ 4
Maxay tahay in ay mas'uuliyiintu sameeyaan? ........ 4
Waa maxay Wilma? ........ 4
Waxaan rabaa in ilmahayga ama da'yarkaygu  uu ka qayb qaato waxbarashada diyaarinta ah. Maxaan sameeyaa? ........ 4
Sidan u codso ........ 4


**Ku soo dhawoow Turku!  Ku soo dhawoow iskuulka!**

Waa maxay waxbarashada diyaarinta ahi?

Waxbarashada aasaasiga ee waxbaridda diyaarinta waxaa loogu tala galay caruurta iyo da'yarta da'doodu u dhexeyso 7 ilaa 16.
Waxbarashada diyaarinta ah waxaa lagu bartaa luqada Finnishka.
Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada deggan Finland waxay dhigan karaan waxbarashada u diyaarinta iskuulka haddii aysan weli ku hadlin luqada Finnishka.

Waxbarashada diyaarinta ah macnaheedu waa waxbarasho uu ardaygu ku barto luqadda Finnishka, uuna ku helo xirfado uu ku barto maadooyin kala duwan.
Waxbarashada diyaarinta ah waxaa wax lagu baraa luqada Finnishka.
Waxbarashadu waa 23-26 saacadood todobaadkii.
Waxbarashadu waxay qaadataa ku dhowaad sanad.
Waxbarashada diyaarinta ah ka dib, ardaydu waxay u gudbaan waxbarashada aasaasiga ah ama waxbarashada heerka labaad
Da'da  iyo taariikhda waxbarasho ee ardayga ayaa saameyn ku leh goobta iskuul ee xigta.
Ardaygu wuxuu leeyahay koox iyo macalin u gaar ah.

Kooxda ayaa inta badan leh hage iskuul dhigasho oo ardayga casharada  ka caawiya.

**Waa maxay hadafka waxbarashada diyaarinta ahi?**

Hadafka waxbarashada diyaarinta ahi waa

1. in ardaygu wax ka ogaado iskuulada Finnishka
2. in ardaygu uu barto luqadda Finnishka
3. in ardaygu si tartiib ah uga gudbo waxbarashada diyaarinta ah una gudbo waxbarashada aasaasiga ah.

**Iskuulku wuxuu ardayga u sameeyaa barnaamij waxbarasho**

Arday kasta waxaa loo sameeyaa barnaamij waxbarasho. Barnaamijka waxbarashadu waa qorshe lagu sheegayo hadafka waxbarasho ee ardayga.  Macalinka, ardayga iyo waalidka ardayga ayaa wadajir u sameeya  barnaamijka waxbarashada.

**Iskuulkee ayaa Turku leh waxbarashada diyaarinta ah?**

Waxbarashada diyaarinta ah waxaa laga heli karaa iskuulo badan oo ku yaal Turku.
Haddii waxbarashada diyaarinta ah aan laga heli karin iskuul ardayga u dhow, markaas waa inuu u safraa iskuul kale**.**
Ardaygu wuxuu iskuulka ku imaan karaa lug, baaskiil ama bas.
Haddii masaafada iskuulku ay dheer tahay, markaa ardaygu wuxuu heli karaa tigidh safar.
Ardayga waxaa la siiyaa tikidh safar, haddii masaafada iskuulku ay ka dheer tahay 5 km.

**Waxyaabaha muhiimka ah ee iskuulada Finnishka**

Ardaygu muxuu u baahan yahay inuu iskuulka u soo qaato?

- Boorsada dhabarka iyo boorsada qalmaanta
- Dhar fudud oo dabacsan oo loogu talagalay xisada cayaarah.

Ardaygu muxuu lacag la'aan kaga helayaa iskuulka?

- buugaagta maaddooyinka iyo kuwa wax lagu qoro
- Qalin iyo tirtire/goome
- Qado

Maxaa lagu bartaa iskuulka hoose-dhexe ee Finnishka?

- Luqadda Finishka
- Xisaabta
- cayaaraha
- Muusig

- farshaxan sawireedka
- Ingiriis
- Iswiidhish
- Bayoolajiga iyo Juquraafiga
- Fiisigiska iyo Kiimikada
- Taariikhda iyo cilmiga bulshada
- macluumaadka caafimaadka
- maadada dhaqaalaha guriga
- hawlgacmeed
- Diinta ama cilmiga aragtida macnaha nololeed

Maadooyinka oo dhan laguma baro waxbarashada diyaarinta ama fasalada oo dhan

Macalinka ayaa bixiya jadwalka xisadaha**.**
Jadwalka xisadaha waxaa ka muuqda waqtiga uu iskuulku billaabanayo iyo waqtiga uu dhammaanayo.

Ardaygu wuxuu sidoo kale baran karaa afkiisa hooyo iskuulka ka dib.
Wixii dheeraad waxaad weydiin kartaa macalinka.

Sannad dugsiyeedku wuxuu billodaa isbuuca labaad ee bisha Agoosto wuxuuna dhammaadaa isbuuca 22-aad.
Fasaxa xilli-dugsiyeedka waxaa ku jira fasaxa dayrta, fasaxa kirismaska, fasaxa jiilaalka iyo maalmo kale oo fasax ah.

**Dharka iskuulka**

Iskuulku ma laha dhar iskuul ah. Iskuulka waxaad ku xiran kartaa dhar aad adigu iska leedahay oo ku wanaagsan waxbarashada.
saacadda biririfta/saacadda banaanka loo baxo.
Dharka bannaanka lagu joogo u soo qaado hadba cimiladu sida ay tahay.
Xisada cayaaraha waxaad u baahan tahay inaad soo xirato dhar jilicsan oo debecsan.
Macallinka ayaa kuu sheegaya inaad bannaanka u baxeysid ama gudaha joogeysid iyo dharka aad u baahan tahay.

**Iskuulka maxaa muhiim ah?**

Waxbarashadu waa waxa ugu muhiimsan iskuulka.
Waa muhiim in qof kastaa uu helo waqtiga ugu fiican ee diskuulka.
Noqo saaxiib wanaagsan oo qalbi wanaagsan u muuji qof walba.
xisada waxaad la shaqeysaa dhammaan asxaabtaada fasalka oo dhan.

Takooridu waa mamnuuc Qof kastaa wuxuu leeyahay xuquuq iyo fursado isku mid ah.
Si kala duwan ula dhaqmida ku salaysan jinsiga, diinta, midabka maqaarka, luqadda, dhalashada, dookha galmada, asalka, da'da iyo ra'yigu waa mamnuuc.

Maalin kasta imaaw iskuulka.
Haddii arday maqan yahay (tusaale ahaan, xanuunsan yahay), Waalidka ayaa macallinka ku soo wargelinaya farriin.
Macallinka u sheeg maqnaanshaha isla marka aad ogaato.

**Maxay tahay in uu ardaygu sameyo?**

Noqo saaxiib wanaagsan oo qalbi wanaagsan u muuji qof walba.
Shaqadaada iskuulka si taxaddar leh u samee oo waqtigeeda ku samee.

**Maxay tahay in ay mas'uuliyiintu sameeyaan?**

Mas'uul macnaheedu waa hooyo, aabbe, macallin ama qof weyn oo kale oo ilmuhu la nool yahay.
Mas'uulku waa qofka weyn ee daryeela ilmaha.
Mas'uulka ayaa hubiya in ardaygu uu dhigto iskuulka oo uu sameeyo shaqadiisa guriga.
Mas'uulku waa caawini kara ardayga laakiin wax uma qaban karo.

**Waa maxay Wilma?**

Wilma waa nidaamka fariimaha iyo macluumaadka ee dugsiga u gaarka ah.
Macalinka ayaad ka heleysaa macluumaadka lagu galo Wilmada.
Wilma waxaad ka arki kartaa jadwalka xisadaha, fariimaha, shaqada guriga, imtixaanada iyo macluumaad kale oo muhiim ah.
Wilmada waad ka jawaabi kartaa oo farriin ayaad u diri kartaa macallinka.

Liiska xusuusta ee mas'uulka

- Maalin kasta hubi in ilmahaagu uu sameeyay shaqadiisa guriga.
- Hubi in dhammaan dharka iyo alaabta maalinta xigta ay diyaar u yihiin.
- Macallinka u soo sheeg marka ilmahaagu ka maqan yahay iskuulka (xanuun, ballan dhakhtar, iwm.)
- Taageer oo ku dhiiri geli ilmahaaga dhigashada iskuulka.
- Weydiiso iskuulka caawimaad haddii aadan aqoon sida loo taageero ilmahaaga.

**Waxaan rabaa in ilmahayga ama da'yarkaygu uu ka qayb qaato waxbarashada diyaarinta ah. Maxaan sameeyaa?**

Codso booska waxbarashada diyarinta ee loogu talagalay ilmahaaga ama da'yarka isla marka uu yimaado Finland.
Waxaad sidoo kale codsan kartaa boos marka aad ogaato waqtiga uu ilmahaagu ama da'yarku imaan doono Finland.
Waxaad codsan kartaa boos waxbarashada diyaarinta sanadka oo dhan.

**Sidan u codso**

Waxaad codsan kartaa boos waxbarashada diyaarinta ee loogu talagalay ardayga adigoo isticmaalaya xayeysiiska ardayga ee laga helo bogga internetka ee Magaalada Turku.
Codsiga la buuxiyay waa in lagu soo diraa emayl ahaan Tenna Käpylä (tenna.kapyla@turku.fi).